Somebodyelse'schild

National Private Fostering Campaign 19-25 January 2009

# Ilmo Qof Kale

## Olalaha Heer Qaran ee Korinta Ilmo Qof Kale ee Gaarka ah 19-25 Bisha Koobaad 2009

Sharaxaadda korinta ilmo qof kale ee gaarka ah

Shuruudaha Sharci ee laga rabo daryeele gaar ah oo korinaya ilmo qof kale

Ma tahay ilmo si gaar ah qof kale u korinayo?

Ma tahay daryeele gaar ah oo koriya ilmo qof kale?

Maxaa la sameeyaa haddii aad og tahay in ilmo qof kale si gaar ah qof u korsanayo?

## Sharaxaadda korinta ilmo qof kale ee gaarka ah

Korinta ilmo qof kale ee gaarka ah (Private fostering) waa marka ilmo da'diisu ka yar tahay 16 sannadood (ama ka yar 18 haddii ilmuhu naafo yahay) loo geeyo qof aan ahayn waalidkii ama qaraabo soke ama qof leh mas'uuliyad daryeel si loo daryeelo ilmaha, iyada oo la adeegsanayo heshiis gaar ah oo dhex mara waalidka ilmaha iyo daryeele, taasoo dhan 28 maalmood ama ka badan. Qaraabada soke waxa loo sharaxay inuu yahay qof ay waalidka ilmaha is qabaan, awow ama ayeeyo, walaalka ilmaha, walaasha ilmaha, adeer/abti ama edo/habar-yar (qofkaasi ha ahaado qaraabo dhiig oo buuxa, ama qaraabo dhiig oo hal dhinac ama badh ah ama qof ay waalidka leeyihiin xiidhiidh guur ama wada-joogis madani ah).

## Shuruudaha Sharci ee laga rabo daryeele gaar ah oo korinaya ilmo qof kale

Haddii qof uu noqdo daryeele gaar ah oo korinaya ilmo qof kale, taasoo macnaheedu yahay inuu daryeelayay ilmo qof kale dhalay mudo dhan 28 maalmood ama ka badan, waxa uu sharcigu rabaa inay ogeysiiyaan golahooda degmada (local council).

**Waa dambi in aan la ogeysiin golaha degmada heshiis korin ilmo qof kale oo gaar ah.**

## Ma tahay ilmo si gaar ah qof kale u korinayo?

Haddii waalidkaa ama qof ka tirsan qoyskaaga soke uu weydiisto qof kale inay kugu sii hayaan ama kugu daryeelaan gurigooda, sidii aad tahay ilmahooda oo kale, mudo dhan 28 maalmood ama ka badan, waa markaas oo kale laga soo qaadayaa in si gaar ah qof kale kuu korinayo.
Qofka kugu haya ama kugu daryeelaya gurigiisa waxa la yidhaahdaa **daryeele gaar ah oo korinaya ilmo qof kale** (**private foster carer)**.

### Dadka u baahan inay ogaadaan cidda aad la joogtid ama ku daryeesha iyo meesha aad ku nooshahay

Haddii aanad la noolayn qoyskaaga waxa uu golaha degmadu u baahan yahay inay ogaadaan cidda aad la joogtid ama ku daryeesha iyo meesha aad ku nooshahay. Tan kaliya waxa looga dan leeyahay ammaankaaga si ay u hubsadaan in adiga iyo ilmo kasta oo adiga oo kale ahi uu ammaan yahay oo si fiican loo daryeelo.

### Waxyaabaha la rabo in daryeelaha gaarka ee korinaya ilmo qof kale adiga kuu qabto marka aad la nooshahay

Mudada aad la nooshahay daryeelaha gaarka ah ee korinayo ilmo qof kale waxa laga rabaa inuu kuu daryeelo ama kuu dhaqaaleeyo sidii aad tahay ilmahoodii oo kale. Waa inay kuu sameeyaan

waxyaabaha maalin kasta waalidku u qabtaan ilmahooda. Waxa aanu halkan ku taxnay ama ku qornay waxyaabaha aasaasiga ah ee laga rabo.

- Waa inay ku siiyaan cunto wakhtiyada caadiga ah – sida quraac, qado iyo casho
- Waa inay u hubsadaan in timahaaga iyo maqaarkaaga si haboon loo daryeelo
- Waa inay u hubsadaan inaad haysatid dhar dhaxanta celinaya oo nadiif ah iyo sariir gaar kuu ah
- Waa inay u hubsadaan inaad tagtid dugsiga si aad wax u baratid
- Waa inay kuu geeyaan dhakhtarka ama cisbitaalka haddii aad jiran tahay ama xanuunsatid ama dhaawac kugu dhaco, ama haddii aad u baahan tahay talaalo
- Waa inay kuu geeyaan dhakhtarka ilkaha si ilkahaaga si haboon loo daryeelo
- Waa inay u hubsadaan inaad heshid fursad aad ku sameysatid saaxiibo iyo inaad ku raaxeysatid ciyaaraha iyo madaadalada aad jeceshahay
- Waa inay kaa gargaaraan inaad xidhiidh la yeelatid qoyskaaga
- Waa inay kaa gargaaraan inaad ku dhaqantid diintaada iyo caadooyinka muhiimka u ah adiga iyo qoyskaaga

Waxa kale oo daryeelaha gaarka ee ku korinaya laga rabaa inuu sidoo kale ixtiraamo waxyaabaha muhiimka u ah adiga iyo qoyskaaga. Haddii aad leedihiin dhaqamo diineed sida wakhtiyo gaar ah oo salaada la tukado ama cuntooyin gaar ah oo aad cuntaan, waxa daryeelaha gaarka ah ee ku korinaya laga rabaa inuu ixtiraamo waxyaabahaas oo uu kaa gargaaro inaad ku dhaqantid caadooyinkaas. Waa inay kaa gargaaraan inaad wax ka baratid dhaqankaaga oo aad la kulantid dad ka tirsan beeshaada oo ku hadla luqaddaada.

### Waxyaabaha aan la rabin inuu sameeyo daryeelaha gaarka ah ee korinaya ilmo qof kale

Wali waxa aad ilmo u tahay waalidkaagii. Waa inaan daryeelahaaga gaarka ahi:

- beddelin magaacaga;
- beddelin dugsigaaga;
- kuu geynin qoys kale;
- ku geynin meel kale oo ka tirsan wadankan;
- ku geynan wadan kale isaga oo aan u sheegin waalidkaa oo aan oggalaansho iyaga weydiisan.

Marka qof oggalaansho bixiyo macnaheedu waxa weeye markii wax la weydiistay ayay “haa” su’aashii kaga jawaabeen. Haddii aad u baahan tahay daweyn caafimaad oo culus, waa in waalidkaaga dhabta ahi taas oggalaadaan – haddii aan arrintu ahayn degdeg oo aan waalidka dhakhso loola xidhiidhi karin. Markaasoo kale dhakhtarka ayaa go’aan ka gaadhi doona wixii la sameyn lahaa.

### Dhibaatooyin ma kaa haystaan daryeele gaar ah oo aad la nooshahay?

Waxa aad wici kartaa:

- Khadka Ilmaha (ChildLine) oo ah 0800 1111
- Khadka (The Line) oo ah 0808 884444

Ama bogqa www.childline.org.uk

## Ma tahay daryeele gaar ah oo koriya ilmo qof kale?

Haddii aad noqotid daryeele gaar ah oo koriya ilmo qof kale, taasoo macnaheedu yahay inaad haysay ama daryeelaysay ilmo qof kale mudo dhan 28 maalmood ama ka badan,  waxa uu sharcigu kaa rabaa inaad ogeysiisid golaha degmadaada (local council).

- Waa inaad taas u sameysid sida ugu dhakhsaha badan marka aad ogaatid in heshiiska dhex maray adiga iyo waalidka ilmaha ama qaraabada ilmaha uu socon doono mudo ka badan 28 maalmood.
- Waxa kale oo lagaa rabaa inaad golaha degmadaada u sheegtid marka aad ilmaha celisid ee uu ka baxo daryeelkaaga, adiga oo u sheegaya faahfaahinta qofka la wareegay haynta ama daryeelka ilmaha.

**Waa dambi in aan golaha degmada la ogeysiin heshiis korin ilmo qof kale oo gaar ah.**

Faahfaahinta golaha degmadaada waxa laga heli karaa www.somebodyelseschild.org.uk/notify

### Waxa golaha degmadu sameeyo marka la ogeysiiyo heshiis korin ilmo qof kale oo gaar ah

Dhamaan golayaasha degmooyinka waxa sharcigu ka rabaa inay u hubsadaan in dhamaan caruurta xaaladoodu tahay korin ilmo qof kale oo gaar ah uu daryeelayo daryeele haboon kuna nool yihiin deegaan haboon. Sababta tani muhiim u tahay waxa weeye si loo hubsado in ilmuhu ammaan yahay iyo in baahidiisa la haqabtiro. Xaaladaha qaarkoodna waxa laga yaabaa in aanay suurtogal u ahayn waalidka inay ogaadaan sida loo daryeelo ilmahooda.

Marka golaha  la ogeysiiyo heshiiska korinta ilmo qof kale ee gaarka ah waxay:

- si joogta ah u booqan doonaan daryeelaha korinaya ilmo qof kale iyo ilmaha iyaga oo gurigooda si ay ula hadlaan;
- waxa kale oo ay la hadli doonaan waalidka;
- markii loo baahdo waxay bixin doonaan gargaar iyo talo.

Hase yeeshee, haddii golaha degmadu u maleeyo in daryeelku aanu haboonayn isla markaana aan ilmaha loo celin karin waalidkii, waxa uu goluhu go’aan ka gaadhi doonaa talaabadii la qaadi lahaa si loo ilaaliyo danta ilmaha. Taas macnaheedu waxay noqon kartaa taageero la siiyo daryeelaha ama, xaaladaha qaarkood, ilmaha oo cid kale oo daryeesha loo geeyo.

## Diyaar uma tihid miyaa inaad wacdid golaha degmadaada?

Haddii aad tahay daryeele gaar ah oo koriya ilmo qof kale ama haddii ay cid kale si gaar ah u korinayso ilmo qof kale ama aad taqaanid ilmo uu korinayo qof aan ilmaha waalid u ahayn, waa inaad wargalisid golaha degmadaada.

Hase yeeshee, haddii aad jeceshahay inaad arrinta marka hore qof kala hadashid, fadlan wac khadka la-talinta ee BAAF ee ka jira aaggaaga:

- **Koonfurta Iglan: 020 7421 2670**
- **Badhtamaha iyo Waqooyiga Iglan: 0870 241 0663**
- **Waylis: 029 2076 1155 ama 01745 336336**.

Taas beddelkeeda, tijaabi mid ka mid ah hay'adahan:

**Xarunta Sharciga ee Caruurta (Children's Legal Centre)**

0845 1202948

www.childrenslegalcentre.com

Xarunta Sharciga ee Caruurtu (Children's Legal Centre) waxay khibrad sannado badan ah u leedahay bixinta la-talin sharci iyo wakiilnimo ay siiso caruurta, daryeeleyaashooda iyo xirfadleyda dhamaan gudaha Boqortooyada Midowday (UK).

**Hay'adda Samafalka ee Victoria Climbie (Victoria Climbie Foundation)**

020 8574 4121

www.victoria-climbie.org.uk

Waa hay'ad madax-banaan oo ku saleysan xuquuqda oo la shaqeysa caruurta iyo qoysaskooda; waxay xidhiidhisaa hay'adaha sharci, adeegyada daryeelka, iyo beelaha Madowga iyo Qowmiyadaha Tirada Yar (BME).

**Khadka Gargaarka Qoysaska Maxaabiista (Prisoners' Families Helpline)**

0808 8082003

www.prisonersfamilieshelpline.org.uk

Haddii aad ilmo daryeeshid sababta oo ah waalidkood ayaa ku jira xabsi, waxa aad la hadli kartaa Khadka Gargaarka Qoysaska Maxaabiista, oo ah adeeg teleefon oo ah bilaash iyo qarsoodi.

**Adeegga Bulsho ee Caalamaga ah ee UK (International Social Service UK - ISS UK)**

www.issuk.org.uk

0207 735 8941

ISS UK waa hay'ad samofal oo diiwaansan oo gargaarta shakhsiyo iyo xirfadley ay soo wajahday arrimo daryeel ilmo iyo qoys oo khuseeya laba wadan ama wax ka badan. ISS UK waxay leedahay khad war iyo la-talin oo furan Isniin ilaa Jimce, 10:00-13:00 & 14:00-16:00. Waxa kale oo aad iimayl ugu diri kartaa info@issuk.org.uk

## Warka aad u baahan tahay inaad ka ogaatid ilmaha qof kale ee aad si gaar ah u korinaysid

Si lagaaga gargaaro fahmidda ilmaha iyo inaad u daryeeshid sida ugu fiican, waxa aad war uga baahan tahay waalidka ilmaha ama qaraabadiisa soke.

Waxa warkaas ka mid noqonaya:

- taariikhdii hore ee ilmaha
- caafimaadka ilmaha
- waxa uu ilmuhu jecel yahay inuu cuno
- dugsiga
- war ku saabsan diinta, dhaqanka ama qowmiyadda ilmaha
- waxyaabaha ilmaha u ah maararow ama madadaalo

## Maxaa la sameeyaa haddii aad og tahay in ilmo qof kale si gaar ah qof u korsanayo?

Haddii aad og tahay in ilmo qof kale si gaar ah qof u korsanayo, fadlan ha iska iloobin. Waxay u badan tahay in wax kastaa fiican yihiin, laakiin waxa uu sharciga rabaa in waalidku/daryeeluhu wargaliyo golaha degmada. Haddii ay haboon tahay la hadal waalidka ama daryeelaha. Taas beddelkeeda, waxa aad toos ula xidhiidhi kartaa golaha. Si aad u heshid faahfaahinta waaxda korinta ilmo qof kale ee golaha degmadaada tag http://www.privatefostering.org.uk/councils.

Haddii aanad ku dhiiran karin inaad golaha toos u wacdid, waxa jira hay'ado samofal oo madax-banaan oo dhawr ah oo aad la hadli kartid si ay kuula taliyaan. Qaar ka mid ah kuwaas waxay imminkaba ku yaalaan ama ku qoran yihiin qoraalkan (eeg qaybta Ma tahay daryeele gaar ah oo koriya ilmo qof kale?).